XAQIIQADA FUDUD
ee
RUMEEYAHA CUSUB

(Su'aala iyo Jawaaba)

DABACADDA LABAAD
QEYBTA 2.0

Horudhaca

Sanada badan God's people ayaa adeegsaneysay xul su'aala iyo jawaaba ah si ugu caawisa barista rumeeyaha cusub xaqiiqada muhiimka u ah iyaga. Bugaani ayaa sinaaya xaqiqadaani muhiimka ah jiilka cusub ee dadka raacsan ciisa masiix.

Bugga kani wuxuu ka kooban yahay 144 su'aala iyo jawaaba ah. Su'aal kasta waxaa daba joogta jawaab. Jawaab kastana waxaa daba taala qeyba ka tirsan Bible-ka. Qeyb kasta oo Bible ka tirsana waxaa kujura cinwaanka buugga (tusaale ahaan: Bilowgii). Magaca buugga waxaa raacsan suuradda laga soo qaatay weybta iyada ah (tusaale ahaan: suuradda 2aad). Tani waxaa raacsan aayadda ama aayadaha qeybtaasi laga helo (tusaale ahaan: aayadda 3aad). Marka, Bilowgii suradiisa 2aad iyo aayadda sadaxaad waxay noqoneysa sidaan: Bilowgii 2:3.

Waxaa soo guuriye:
www.clearandsimplemedia.org

Si aad u heshid bugaan oo electronic ah, booqo:
www.asimpleword.org

Waxaa tarjumay:
www.christian-translation.com

Jawaabaha qaar waxaa la soconi doono qeybo sadara ah (Tusaale ahaan: Q. 4).

QEYBTA KOWAAD
ILAHEY IYO INSAANKA
Su’aalaha 1aad ilaa iyo 26aad

QEYBTA LABAAD
DAMBIGA* IYO XEERKA*
Su’aalaha 27aad ilaa iyo 62aad

QEYBTA SADAXAAD
MASIIXA IYO BADBAADADA*
Su’aalaha 63aad ilaa iyo 90aad

QEYBTA AFARAAD
RUUXDA IYO KANIISADDA
Su’aalaha 91aad ilaa iyo 117aad

QEYBTA SHANAAD
DUCADA IYO RAJADA
Su’aalaha 118aad iyo 144aad

Hadii aad aragtid calamadaan*, waxay kuu shegeysaa in erayga leh calamadaan laga heli kara liiska xarfaha ee gabagabada bugaan.

QEYBTA KOWAAD
ILAHEY IYO INSAANKA

Q.1 Yaa ku abuuray?
A. Alle ayaa I abuuray.
Bilowgii 1:26-27; Bilowgii 2:7; Falimaha Rasuul 17:26

Q.2 Maxaa kale uu Ilahey abuuray?
A. Ilahey wuxuu abuuray waxyaabaha oo dhan.
Bilowgii 1:31; Sabuurradii 33:6-9; Kolosay 1:16-17

Q.3 Muxuu Ilahey kuu abburay adiga iyo waxyaabah oo dhan ba?
A. Ilahey wuxuu ii aburay aniga iyo waxyaabaha kaleba in la weyneeya*.
Sabuurradii 19:1; Ishacyaah 43:7; 1 Korintos 10:31

Q.4 Sidee baad Ilahey u weyneyni* kartaa?
A. Waxaan Ilaahey weyneyni* karaa marki aan jeclaada oo aan ku kalsonaada. Iyo marki aan sameeya wixi uu sameey I dhaha.
Matayos 5:16; Yooxanaa 14:21; 1 Yooxanaa 5:3

Q.5 Maxaad Ilahey u weyneyni*?
A. Waayo uu I abuuray waa uuna ii daryelaa.
Sabuurradii 145:9; 1 Butros 5:7; Mujintii 4:11

Q.6 Meqaa ilaah ayaa jirta?
A. Waxaa jira hal Ilaah oo kaliyah.
Sharciga Kunoqo 6:4; Ishacyaah 45:5; Yeremyaah 10:10

Q.7 Meqaa qof ayuu Ilahey uu u jiraa?
A. Ilahey wuxuu u jira sadax qof.
Matayos 3:16-17; Yooxanaa 5:23; Yooxanaa 10:30; Yooxanaa 15:26

Q.8 Waa kuwee kuwaasi?
A. Aabaha, wiilka, iyo ruuxda muqadaska ah*.
Matayos 28:19; 2 Korintos 13:14; 1 Butros 1:2

Q.9 Ilahey muxuu yahay?
A. Ilahey waa ruux*. Malahan jir sida kan insaanka oo kale ah.
Yooxanaa 4:24; 2 Korintos 3:17; 1 Timoteyos 1:17

Q.10 Ma bilaw ayuu leeyahay Ilahey?
A. Maya, Ilahey uu jiray waligis, uuna jiri donaa.
Baxniintii 3:14; Sabuurradii 90:2; Ishacyaah 40:28

Q.11 Ma badalmaa Ilahey?
A. Maya, Ilahey waligiis sidaan ayuu ahanayaa.
Sabuurradii 102:26-27; Malachi 3:6; Cibraaniyada 13:8

Q.12 Halkuu joogaa Ilahey?
A. Ilahey wuxuu joogaa meel kasta.
Sabuurradii 139:7-12; Yeremyaah 23:23-24; Falimaha Rasuul 17:27-28

Q.13 Ma arki kartaa Ilahey?
A. Maya, ma arki kara ilahey, balse isaga uu I arki karaa markasta.
Sabuurradii 33:13-15; Maahmaayadii 5:21; Yooxanaa 1:18; 1 Timoteyos 1:17

Q.14 Miyuu Ilahey ogyahay wax kasta?
A. Haa, ilahey wax kasta uu arkayaa. Waxba ma ka qarini kari ilahey.
1 Samuel 2:3; Maahmaayadii 15:3; Cibraaniyada 4:13

Q.15 Ilahey ma sameyni karaa waxkasta?
A. Haa, Ilahey uu sameyni karaa waxkasta oo muqadas* ah oo uu doono.
Ishacyaah 46:9-10; Danyeel 4:34-35; Efesos 1:11

Q.16 Halkeen ka bartaa sida aan ku oganaaya, ku aaminaaya, ku jeclanaaya kuna raaco ilahey?
A. Ilahey wuxuu igu tusay sida aan ku oganaaya, ku aminaaya, ku jeclanaaya kuna racaaya hadalkiisa, waa Bible-ka.
Sabuurradii 119:104-105; Yooxanaa 20:30-31; 2 Timoteyos 3:15

Q.17 Muxuu Bible-ka ku barayaa?
A. Bible-ka wuxuu abarayaa xaqiiqada ku saabsan ilahey iyo qorshahiisa uu ku badbadinta dunida ciisa masiix. Wuxuuna ibarayaa xaqiiqada dhabta ah ee nafteyda ku saabsan.
Sabuurradii 119:159-160; Yooxanaa 17:17; 2 Timoteyos 3:14-17

Q.18 Yaa qoray Bible-ka?
A. Rag uu hogaamiye waxna baray ruuxa muqadaska* ah.
2 Butros 1:20-21; 2 Butros 3:15-16

Q.19 Yaa waaye walidiinteena ugu horeeye?
A. Adam iyo xaawa.
Bilowgii 3:20; Bilowgii 5:1-2

Q.20 Sidee buu ilahey ku abuuray walidinteeni ugu horeeye?
A. wuxuu Ilahey Adam ka abuuray dhooqa. Wuxuuna xaawa ka abuuray jirka Adam.
Bilowgii 2:7; Bilowgii 2:21-23; Bilowgii 3:19; Sabuurradii 103:14

Q.21 Sidee bay Adam iyo Xaawa ugu duwanayeen waxkasta oo Ilahey abuuray?
A. Ilahey wuxuu Adam iyo Xaawa u abuuray suuradiisa oo kale.
Bilowgii 1:26-27

Q.22 Sidee baan ugu arkeynaa suuradda ilahey Adam iyo Xaawo?
A. Ilahey ayaa siiye awood ay ku xukumaan aburkiisa kale. Waxay fahmi kareen wixi xaqiiqada ah. Waxay jeclaani kareen wixi saxda ah. Waxay isticmali kareen wixi quruxsan. Waxay sameyni kareen wixi ay ilahey ku raali galini lahayeen. Waxay la hadli kareen ilahey iyagana way isla hadli kareen.
Bilowgii 1:26-27; Bilowgii 2:7-9; Sabuurradii 147:10-11; Filiboy 4:8

Q.23 Waxa aan ka ahayn jir, maxaa kale oo uu ilahey siiye Adam iyo Xaawa?
A. Wuxuu siiye naf* aan waligeed go'eynin.
Bilowgii 2:7; Sharciga Kunoqo 6:5; Wacdiyahii 12:7; Matayos 16:26

Q.24 Maleedahay naf* iyo jirba?
A. Haa, waxaan leeyahay naf* aan waligeed go'eynin.
Zechariah 12:1; Falimaha Rasuul 7:59; 2 Korintos 5:8

Q.25 Sidee bay ahayeen Adam iyo xaawo marki uu ilahey aburaaye?
A. Ilahey wuxuu ka dhigay kuwa muqadas* ah oo na faraxsan. Waxay kula nolayeen ilahey janadi lagu dhex abuuray.
Bilowgii 1:26-28; Bilowgii 2:15-17; Bilowgii 2:25; Sabuurradii 8:4-8

Q.26 Ilahey muxuu uga bahnaaye Adam iyo Xaawo?
A. Ilahey wuxuu ugu bahnaaye Adam iyo Xaawo inay aaminaan oo ay si buuxda ugu hogaansamaan.

Bilowgii 2:15-17; Sabuurradii 8:4-8

QEYBTA LABAAD
DAMBIGA IYO SHARCIGA

Q.27 Adam iyo xaawo miyay u hogaansadeen ilahey oo ay noqdeen kuwa muqadas* ah oo faraxsan?

A. Maya, ma u hogaansamin. Oo waxay doorteen inay dambi ku dhacaan.
Bilowgii 3:6-8

Q.28 Waa maxay dmabiga*?
A. Dambigu waa in aan la sameynin wixi uu ilahey sameeya nagu yiri. Iyo marki aan sameyna waxa uu ilahey inaga reebay.
Rooma 1:32; Yacquub 2:10-11; Yacquub 4:17; 1 Yooxanaa 3:4

Q.29 Maxuu mutaa dambi* kasta?
A. Dambi* kasta wuxuu mutaa carada iyo ciqaabta ilahey.
Sharciga Kunoqo 27:26; Rooma 1:18; Rooma 6:23; Efesos 5:6

Q.30 Waa maxay dambigi* walidinteeni ugu horeeye?
A. Waxay cuneyn miraha geedki uu Ilahey ha cunina ku yiri.
Bilowgii 2:16-17; Bilowgii 3:6

Q.31 Yaa ku booriye inay dambiga* galaan?
A. Sheydaan* ayaa ku booriye Hawa waxayna miihii siisay Adam.

Bilowgii 3:1-5; Yooxanaa 8:44; 2 Korintos 11:3; Mujintii 12:9

Q.32 Maxaa dunida ku dhacay marki ay walidinteeni ugu horeeye ay dambabeer?
A. Ilahey nacalad ayuu u soo diray dunida. Waxaana dunida yimaaday malakul mawt, sida marki horeba ilahey uga digay iyaga.
Bilowgii 2:15-17; Bilowgii 3:16-17

Q.33 Maxaa ku dhacay walidinteeni ugu horeeye marki ay dambiga ku dhaceen?
A. Janada ayaa laga soo erye Adam iyo Xaawa. Ma ahayn kuwa muqadas* ah ama faraxsan. Balse waxay ahayeen kuwa dambaabay* - dambiileyaal, kuwa cebeysan oo na cabsanaaya.
Bilowgii 3:8-13; 16-19; 23

Q.34 Sababtoo ah Adam inuu dambi ku dhacay darteed, maxaa qabsaday dadka nolaaye isaga ka dib?
A. Qof kasta oo dhashay Adam iyo Xaawo ka dib waxay dhasheen iyaga oo dambileyaal* ah.

Sabuurradii 51:5; Rooma 5:18-19; 1 Korintos 15:21-22

Q.35 Ilahey miyuu dunida lacnaday? Miyuu dadka ku dhaafay dambigooda?
A. Maya, Ilahey wuxuu xushay in uu badbaadiya. Ilahey wuxuu balan qaaday in uu badbaadiye* u soo diro.
Matayos 1:21; Yooxanaa 3:16-17; 1 Yooxanaa 4:14

Q.36 Waa maxay axdiga*?
A. Axdiga waa balanqaad culus oo ka dhaxeeya laba qof ama wax ka badan.

Q.37 Axdi nocee ah ayuu ilahey la galay dadka reer Israel*?
A. Ilahey wuxuu u ballan qaaday qoyska Ibrahiim inay noqdaan wadan ballaran. Wuxuu ballan qaaday in uu wadam dhan uu ku barakeeya Ibrahiim.

Ilahey wuxuu Muuse siiye sharciga. Wuxuu ballan waaday in uu Muuse garab tagnaada oo uu barakeeya rer Israel hadii ay u hogansamaan oo ay racaan sharciga uu usoo dejiye.

Ilahey wuxuu u ballan qaaday Da'uud in uu mid ka mid ah wilashiisa uu noqoni doona boqor weyn oo uu ilala bad xukumi doona.

Ilahey wuxuu ballan ku qaaday in uu malin un sameyni doona axdi cusub. Oo uu dambi dhaafi doona dadka oo uu badali doona quluubta

dadka
Bilowgii 12:1-3; Bilowgii 15; Baxniintii 24:3-7; 2 Samuel 7:16; Yeremyaah 31:31-34

Ammarada Tobnka Ah

Q.38 Waa maxay ammarada tobanka ah?
A. Ammarada tobanka ah waa eraya uu ilahey ugu soo dhiibay Muuse dadka rer Israel*. Ilahey ayaa ku qoray ammarada tobanka ah laba dhagax.
Baxniintii 31:18; Sharciga Kunoqo 9:10

Q.39 Maxay yihiin ammaradaasi?
A. Ilahey kala ha iga horumarinin
Ha iska dhigin sanam* lacaabudo adigana ha caabudin*.
Ha u adeegsanin magaca ilahey*, ilaheygaaga qaab qaldan.
Xasuuso in aad maalinta Sabbath-ka* ah aad fasax ka dhigtaan.
Sharaf* aabahaa iyo hoyadaa.
Qofna ha dilin
Ha sineysanin*
Wax ha xadin
Ha ku been abuuranin dariskaaga.
Ha u hanqal taagin wuxuu leeyahay dariskaaga.
Baxniintii 20:1-17

Q.40 Waa maxay ammarka kowaad?
A. ammarka kowaad waa: Ilahey kala ha iga horumarinin.
Baxniintii 20:3; Ishacyaah 45:5-6

Q.41 Ammar kowaad muxuu na barayaa?
A. Ammarka kowaad wuxuu na barayaa in la caabudo* Ilahey oo kaliyah.
Sabuurradii 44:20-21; Matayos 4:10; Mujintii 22:8-9

Q.42 Waa maxay ammarka labaad?
A. Ammarka labaad waa: Ha iska dhigin sanam* lacaabudo adigana ha caabudin*.
Baxniintii 20:4-6; Sharciga Kunoqo 5:8-10

Q.43 Ammar labaad muxuu na barayaa?
A. Ammarka labaad wuxuu ibarayaa in aan cabudin sanam* ama sawiro.
Ishacyaah 44:10-11; Ishacyaah 46:5-9; Falimaha Rasuul 17:29

Q.44 Waa maxay amaarka sadaxaad?
A. ammarka sadaxaad waa: Ha u adeegsanin magaca ilahey*, ilaheygaaga qaab qaldan

Baxniintii 20:7; Sharciga Kunoqo 5:11

Q.45 Amarka sadaxaad muxuu na barayaa?
A. Ammarka sadaxaad wuxuu na barayaa in aana magaca ilahey u adeegsanin qaab aan isaga Sharaf * u lahayn.
Ishacyaah 8:13; Sabuurradii 138:2; Mujintii 15:3-4

Q.46 Waa maxay ammarka afaraad?
A. Ammarka afaraad waa: Xasuuso in aad maalinta Sabbath-ka* ah aad fasax ka dhigtaan.
Baxniintii 20:8-11; Sharciga Kunoqo 5:12-15

Q.47 Ammarka afaraad muxuu na barayaa?
A. Ammarka afaraad wuxuu na barayaa in la sharfo* ilahey xiliga fasaxa, xiliga shaqada iyo xiliga cibaadadaba.
Baxniintii 16:23; Ishacyaah 58:13-14

Q.48 Waa maxay ammarka shanaad?
A. ammarka shanaad waa: Sharaf* aabahaa iyo hoyadaa

Baxniintii 20:12; Sharciga Kunoqo 5:16

Q.49 Ammarka shanaad maxuu na baraysaa?
A. Ammarka shanaad wuxuu na barayaa in jeclaana oo aan u dhaga nuglaano waliidka
Maahmaayadii 1:8; Efesos 6:1-3; Kolosay 3:20

Q.50 Waa maxay ammarka lexaad?
A. ammarka lexaad waa: Qofna ha dilin.
Baxniintii 20:13; Sharciga Kunoqo 5:17

Q.51 Ammarka lexaad muxuu na barayaa?
A. Ammarka lexaad wuxuu na barayaa in aana qof nicin ama aan gooyin

qof naftiis.
Bilowgii 9:6; Matayos 5:21-22; 1 Yooxanaa 3:15

Q.52 Waa maxay ammarka todobaad?
A. Ammarka todobaad waa: Ha sineysanin*
Baxniintii 20:14; Sharciga Kunoqo 5:18

Q.53 Muxuu na barayaa ammarka todobaad?
A. Ammarka todobaad wuxuu na barayaa in aana galma la sameynin qof aan ahayn ninkeena ama nagteena.
Matayos 5:27-28; Efesos 5:3-4

Q.54 Waa maxay ammarka sidedaad?
A. ammarka sidedaad waa: Wax ha xadin.
Baxniintii 20:15; Sharciga Kunoqo 5:19

Q.55 Ammarka sidedaad muxuu na barayaa?
A. Ammarka sidedaad wuxuu na barayaa in aana qaadanin waxyaabaha ay leyihiin dadka kale.
Baxniintii 23:4; Maahmaayadii 21:6-7; Efesos 4:28

Q.56 Waa maxay ammarka sagalaad?
A. Ammarka sagalaad waa: Ha ku been abuuranin dariskaaga.

Baxniintii 20:16; Sharciga Kunoqo 5:20

Q.57 Muxuu barayaa ammarka sagalaad?
A. Ammarka sagalaad wuxuu na barayaa in aan ahaano kuwa aamin ah oo runta sheega.
Sabuurradii 15:1-3; Maahmaayadii 12:17; 1 Korintos 13:6

Q.58 Waa maxay ammarka tobanaad?
A. ammarka tobonaad waa: Ha u hanqal taagin wuxuu leeyahay dariskaaga.

Baxniintii 20:17; Sharciga Kunoqo 5:21

Q.59 Ammarka tobanaad muxuu na barayaa?
A. Ammarka tobanaad wuxuu na barayaa in aan ku qanacno* wixi aan

haysano.
Filiboy 4:11; 1 Timoteyos 6:6; Cibraaniyada 13:5

Q.60 Miyay rer Israel raceen sharcigi Ilahey udhiibay Muuse?
A. Maya, waxay jabiyeen sharciga Ilahey, Ilaheyna uu cadaabay sida horayba loogu digay.
Sharciga Kunoqo 9:12, Yexesqeel 39:23

Q.61 Majiraa qof u ilaalini kara ammaradan sida ay yihiin?
A. Adam waa uu dambaabay. Waqtigaasi kadibna, majiro qof ammaradaani siday yihiin u ilaaliye.
Wacdiyahii 7:20; Rooma 3:23; Yacquub 2:10

Q.62 Ammarada tobanka ah maxay na tusayaan?
A. Ammarada tobanka ah waxay natusayaan in Ilahey yahay muqadas oo uu fiican yahay. Waxay na barayaan sida loo tuso jacayl Ilahey iyo dariskeenaba. Waxay natusayaan in aan nahay dambilayaal oo aana u hogansamin Ilahey. Waxay natusayaan in aan u baahanahay badbaadiye*.
Wacdiyahii 12:13; 1 Timoteyos 1:8-9; Rooma 3:20; 5:13; 7:7-11; Galatiya 3:19-24

QEYBTA SADAXAAD
MASIIXA IYO BADBAADADA*

Q.63 Waa kee Badbaadiyaha*?
A. Badbaadiyaha* Kaliyah ee dambilayaasha* waa Ilahey* Ciisa Masiix.
Luukoos 2:11; Falimaha Rasuul 4:11-12; 1 Timoteyos 1:15

Q.64 Waa kee Ciisa Masiix?
A. JCiise Masiix waa waligiis jiraha* ah wiilka ilahey.
Yooxanaa 1:1,14,18; Yooxanaa 3:16,18; Galatiya 4:4; Kolosay 1:15-18; Cibraaniyada 1:1-3; 1 Yooxanaa 5:20

Q.65 Maxaa uu ilahey ugu soo diray wilkiisa dunida?
A. Wuxuu ilahey ugu soo diray wilkiisa dunida, waayo uu na jecelyahay. Wuxuu wilkiisa u soo diray waayo waa naxariis iyo raxmad* badanyahay.

Sabuurradii 103:8-11; Yooxanaa 3:16-17; Rooma 5:7-8; Efesos 2:4-5; 1 Yooxanaa 4:9-10

Q.66 Ciise Masiix miyuu ahay ilahey iyo insaanba?
A. Haa, Ciise wuxuu ahaay ilahey wuxuuna ahaa insaan.
Yooxanaa 1:1-3, 14; Filiboy 2:5-11; Kolosay 2:9; Cibraaniyada 2:14-18

Q.67 Shaqa nocee ah ayuu Ciise, badbaadiyaha* sameeye?
A. Wuxuu ugu hogaansame Ilahey qaab kasta wuxuuna qaatay ciqaabta dadka dambiileyaasha* ah.
Rooma 8:3-4; Filiboy 2:7-8; Cibraaniyada 4:15; Cibraaniyada 9:14-15

Q.68 Ciise muxuu u dhintay?
A. Ciise wuxuu fogeeye carada ilahey isaga oo dhintay badalkii dadka dambiilayaasha* ah.
Markoos 10:45; 2 Korintos 5:19-21; Galatiya 3:13

Q.69 Siduu willki ilahey dhibaata u gaartay badalki dadka dambiilayaasha* ah?
A. Ciise, wiilki ilahey ayaa noqday qof insaan ah.
Yooxanaa 1:14; Galatiya 4:4,5; Kolosay 2:9

Q.70 Siduu wiilki ilahey uu qof insaan ah u noqday?
A. Wuxuu ku calool-galay* ruuxda muqadaska ah waxaana dhashay bikradi* maryama ahayd.
Ishacyaah 7:14; Matayos 1:18-21

Q.71 Noolal nocee ah ayuu Ciise Masiix ugu nolaaye dunida?
A. Noolal caadi ah, Sharaf* leh oo na ixtiraam leh.
Matayos 8:20; Matayos 11:28-30; Luukoos 4:18-19; 2 Korintos 8:9; 2 Korintos 10:1

Q.72 Ciise Masiixa ah miyuu waligiis dambaabay*?
A. Maya, wuxuu ahaaye mid muqadas oo nadiif ah
Yooxanaa 8:29; 2 Korintos 5:21; Cibraaniyada 7:26; 1 Butros 2:21-23

Q.73 Dhimasha nocee ah ayuu Ciise Masiix dhintay?
A. Wuxuu ku dhintay istalaabka korkiisa.
Luukoos 23:33; Galatiya 3:13; Filiboy 2:8

Q.74 Masiix miyuu ku nagaaday qabriga markuu dhinaty kadib?
A. Maya, Masiixa wuxuu soo nolaaday maalinta sadaxaad.

Matayos 28:5-7; Luukoos 24:5-8; Rooma 4:25; 1 Korintos 15:3,4

Q.75 Yuu ilahey ka badbadinayaa dambigooda*?
A. Ilahey wuxuu badbaadiya kuwa ka towbad* kenaan dambigooda*. Oo na aaminsan ilaheyga* Ciise Masiix.
Markos 1:14,15; Yooxanaa 3:16-18; Falimaha Rasuul 20:21

Q.76 Towbad* keenku maxay ka dhigan tahay?
A. Towbad* keenku waa in laga shalaaya dambigayga*. Oo aan ka soo noqdo dambigeyga* waayo waxay gaf ku tahay ilahey.
Luukoos 19:8-10; 2 Korintos 7:9-10; 1 Timoteyos 1:9-10

Q.77 Maxay ka micna tahay aaminaadda iyo u kalsonaanta Masiixa?
A. Ku kalsonaanta Masiixa waa aminaanta Ciise. Waxaan aamineyna* isaga oo Kaliyah si uu inoo badbadiya*
Yooxanaa 14:6; Falimaha Rasuul 4:12; 1 Timoteyos 2:5; 1 Yooxanaa 5:11-12

Q.78 Ma towbad* keeni karta oo ma ku aamini karta Masiixa awodaada oo qur ah?
A. Maya, waa in aan gacan ka hela ruuxa muqadaska* ah.
Yeremyaah 13:23; Yooxanaa 3:5-6; Yooxanaa 6:44; 1 Korintos 2:14

Q.79 Dadka halkay ka maqlaan dhabta khuseysa Masiixa?
A. Gospel-ka* dhexdiisa, akhbaarta wanaagsan ee siisa badbaadada* dadka dhan.

Markos 1:1; Falimaha Rasuul 15:7; Rooma 1:16-17

Q.80 Muxuu hadda Masiixa Badbaadiyaha* ah uu inoo noqday?
A. Ciise Masiix wuxuu noqday nabigeena*, Badarigeena iyo Boqorkeena

Matayos 13:57; Yooxanaa 18:37; Cibraaniyada 1:1-3; Cibraaniyada 5:5-6; Mujintii 1:5

Q.81 Siduu Ciise Masiix u noqday Nabi*?
A. Waayo wuxuu na tusay Ilahey. Wuxuuna na baraya sidi aan u raali galini lahayne.
Sharciga Kunoqo 18:18; Yooxanaa 1:18; Yooxanaa 4:25-26; Falimaha Rasuul 3:22; 1 Yooxanaa 5:20

Q.82 Waa maxay sababta aan ugu baahanahay Nabi* nimada Masiixa ?
A. Waayo ma garani karna ilahey isaga la'antiis.
Matayos 11:25-27; Yooxanaa 17:25-26; 1 Korintos 2:14-16

Q.83 Siduu Ciise Masiix ku noqday Badari?
A. Wuxuu dhintay badalkeeni wuxuuna nogala hadlayaa ilahey.
Sabuurradii 110:4; Cibraaniyada 4:14-16; Cibraaniyada 7:24-25; 1 Yooxanaa 2:1-2

Q.84 Maxaan ugu baahanahay Masiixa in uu Badari noqdo?
A. Waayo dambigeena ayaa inaga dhigay edeysanayaal cebeysan.
Maahmaayadii 20:9; Wacdiyahii 7:20; Ishacyaah 53:6; Rooma 3:10-12; Rooma 3:23; Yacquub 2:10

Q.85 Siduu Ciise Masiix ku noqday Boqor?
A. Uu na xukuma uu nan a difacaa.
Sabuurradii 2:6-9; Efesos 1:19-23; Mujintii 15:3-4

Q.86 Maxaan ugu baahanahay Masiixa in uu Boqor uu noqda?
A. Waayo waan jilecsanahay waana baqeynaa.
2 Korintos 12:9-10; Filiboy 4:13; Kolosay 1:11-13; Cibraaniyada 13:5-6; 2 Timoteyos 1:12

Q.87 Baraka* nocee ah Ayaan helnaa marki aan aamina Ciise Masiix?
A. Dambidhaaf* Ayaan ilahey ka heleyna wuxuuna ku dhawaqayaa in aan salixiin* nahay.
Ilahey wuxuu nagu qabilaya qoyskiisa oo aan noqoneyna carurtiisa uu jecelyahay

Ilahey wuxuu naga dhihaya kuwa qalbiga* iyo dabeecadda muqadas* ka ah
Ilahey wuxuu naga dhigayaa kuwa jirka iyo nafta* nadiif ka ah maalinta qiyaama*
Rooma 5:18; Galatiya 4:4-6; Efesos 1:5; Cibraaniyada 10:10-14;
1 Yooxanaa 3:2

Q.88 Baraka* miyuu ilahey isiinaya waayo waxaan ugu shaqeysatay dhaqankeyga wanaagsan?
A. Maya, ilahey wuxuu barakada* ku bixiya naxaristiisa*. Ma u qalmi mana heli kari.
Ishacyaah 64:6; Efesos 2:8-9; Titus 3:4-7

Q.89 Miyuu ilahey waligiis ka qadayaa baraka*diisa kuwa sida dhabta ah u towbad* keneen oo amineen?
A. Maya, Ciise waligis ma ka tagaaya kuwa ku kalsoon* in uu badbadiya*.
Yooxanaa 10:27-30; Rooma 8:38-39; Filiboy 1:6; 1 Butros 1:3-5

Q.90 Waa maxay naxariista* alle?
A. Naxariista* alle waa jecelkiisa wanaaga uu noo sameeya anaga oo aan u qalmin.
Baxniintii 34:6; Efesos 1:7-8; 2 Korintos 8:9

QEYBTA AFARAAD
RUUXA IYO KANIISADDA

Q.91 Alle muxuu ka rabaa dhamaan kuwa aamnineen Ciise in uu yahay badbadiyaha?
A. Wuxuu rabaa inay qalbiga* iyo dhaqanka muqadas ka ahadaan. Wuxuu rabaa inay noqdaan sida Ciise oo kale.
Efesos 1:4; 1 Butros 1:15; 2 Korintos 7:1

Q.92 Siduu alle inoo ga dhigaya kuwa qalbiga* iyo dhaqanka muqadas* ka ah?
A. Alle wuxuu na sinayaa qalbi* cusub. Wuxuuna na sinayaa ruuxda

muqadaska ah.
Yexesqeel 36:26; Rooma 8:1-14; Galatiya 5:22-26; Efesos 1:13

Q.93 Yaa waaye Ruuxda Muqadaska ah?
A. Ruuxda Muqadaska* ah waa ilahey, ilaheyga aabaha ah iyo ilaheyga wiilka ah ayaa soo diray ruuxda muqadaska ah.
Matayos 28:19; Yooxanaa 14:26, Yooxanaa 15:26; 2 Korintos 13:14

Q.94 Ruuxda Muqadaska ah muxuu inoo yahay?
A. Ruuxda Muqadaska ah waa qalbi dajiyaha, waa saxiibka, waana hagaha dhamaan kuwa aaminsan Ciise.
Yooxanaa 16:7-8,12-15; Rooma 8:14-16; 1 Korintos 6:19; Efesos 1:14

Q.95 Sidee baan ku oganayaa in Ruuxda Muqadaska ah ay iga dhigeysa mid muqadas* ah?
A. Waxaan noqonayaa mid sida badbaadiye Ciise Masiix ah. Waxaan miraha muqadaska ka arkayaa qalbigeyga* iyo dhaqankeyga.
Kolosay 1:9-12; Efesos 3:16

Q.96 Waa maxay miraha muqadaska?
A. Miraha muqadaska waa jacayl, farxad, nabad, Samir, naxiriis, wanaag, daacadnima, iyo isxakameyn.
Galatiya 5:22-23

Q.97 Mar waliba ma guleysaneysa* hadii aad raacdid Ciise?
A. Maya, marka qaar dhibaato ayaa iheli karto. Marka qaar waan dhibatooni karaa waana lii nici kara sida Ciise loo nacay.
Yooxanaa 15:18-19; 2 Timoteyos 3:12; Rooma 8:23-25; Yacquub 1:2-4; 1 Butros 4:12-13

Q.98 Siduu alle kuu cawinaya marki ay dhibaato ku haysato?
A. Wuxuu I siinaya ruuxda qalbi dejinta. Wuxuu isiinaya kaniisada inay ii daryeesho. Wuxuu isiinayaa ballantiisa ah inay waxkasta ka shaqeyaan wanageyga iyo weynidiisa.
Rooma 5:3-5; Rooma 8:18; 1 Timoteys 5:11; 1 Butros 4:12-19;
1 Butros 5:10

Q.99 Waa maxay kaniisada caalamiga* ah?
A. Kaniisada Caalamiga* ah waxay ka kooban tahay dadka dhan uu alle xoreeye*.

Kaniisada* waa qoyska allaha aabaha ah. Waa jirka Masiixa wiilka ah. Waa goobta uu Ruuxda* Muqadaska* ku nool yahay.
1 Korintos 12:27; Efesos 3:14-15; Efesos 5:23; Kolosay 1:24; Cibraaniyada 2:11

Q.100 Waa maxay Kaniisada maxaliga* ah?
A. Kaniisada maxaliga* ah waa dad iskuyimaaday oo aaminsan Ciise Masiix oo raacsan waxyaabaha uu dadka baraaya. Ilahey bay isla caabudaan. Waxay isla dhageystaan oo ay isla aqriyaan kitaabka. Way isku daryelaan waana loo daryelaa. Waxay isla baryaan ilahey oo wayna isla shaqeyaan si ay iskula arkaan boqortooyada* alle oo ballaraneysa. Kuwa aaminsan bay u docoyaan oo waxay isla cunaan irsaaqada alle.
Matayos 28:19-20; Falimaha Rasuul 2:41-42; Falimaha Rasuul 8:36-39; Falimaha Rasuul 14:23; Rooma 6:1-5;
1 Korintos 11:23-26; Titus 1:5

Q.101 Miyaad ka qeyb noqoneysa kaniisada maxaliga ah?
A. Haa, kaniisada maxaliga ah waa bulshada igu caawisa in aan kobco oo aan si adag u haysto imaankayga. Waa halka aan kabrta aaminaanta amarada cusub ee Ciise.
Cibraaniyada 10:24-25

Q.102 Waa maxay ammarada cusub oo Ciise uu dhiibay kaniisada?
A. Ciise wuxuu dhahay “is jeclaada. Waa inaad isku jeclataan sida aan idiin jeclaaday”
Yooxanaa 13:34

Q.103 Sidee baan jacylkaan isku tusnaa?
A. Jaceylkaan waxaan is tusinaa marki aan isku naxariisano, isku duceynooo aan is cafino. Waxaan jaceylkaan istusnaa marki aan is sharafno*, is caawino oo aan is dhiira galino. Waxan jaceylkaan is tusinaa marki aan runta isku shegno oo aan bahida midkeena kale ka hor marino

bahideena.
Rooma 12:10; Efesos 4:32; Kolosay 3:9,13; 1 Tesaloniika 4:18; Yacquub 5:16

Q.104 Waa maxay Baptism-ka*?
A. marki la sameynaaya baptism-ka* madaxa kaniisada* ayaa qofka in mudda ah biya dhex galiya. Kadibna qofka ayaa biyaha laga soo dhex bixiyaa. Waxay tani ku sameynayaan magaca aabaha, wiilka iyo ruuxda muqadska ah*.
Matayos 3:6,16; Markos 1:5; Falimaha Rasuul 8:12

Q.105 Yaa la baptized* gareyni karaa?
A. Baptism* waxaa looga tala galay qof waliba oo ka towbad* keena dambigiisa*. Waxaa looga tala galay dadka dhan oo aaminsan Ciise badbaadiye*
Falimaha Rasuul 2:38,39; Falimaha Rasuul 8:36-37; Falimaha Rasuul 16:30-33

Q.106 Baptism* maxay ka micna tahay?
A. Baptism* waa calaamada isku imaanshaha muminiinta* ee masiixa marki uu dhintay, waa la aasay waana laga soo noleeye geerida. Waxay ka dhigantahay in aan qeyb ka ahay kanisadiisa.

Falimaha Rasuul 16:30-33; Rooma 6:3-5; Kolosay 2:12

Q.107 Qabkey masixiyiinta isku xasuusiyaan geerida Ciise?
A. Waxaan isla wadaagnaa irsaaqada alle.

Markos 14:22-24; 1 Korintos 11:23-29

Q.108 Waa maxay Irsaaqada Alle*?
A. Irsaqada Alle* waxaan cunaa rooti waxaana ka cabnaa koobka. Waxaan tani u sameynaa si aan ku xasuusana geeridi Ciise Masiix.
Markos 14:22-24; 1 Korintos 11:23-29

Q.109 Rootiga muxuu ka micna yahay?
A. Rootiga jajabka ah ayaa ka hadlo jirki Masiixa ee la jajabiya. wuxuu u

dhintay dambigeena* awgiis.
Matayos 26:26; 1 Korintos 11:24

Q.110 Koobka muxuu ka micna yahay?
A. Koobka wuxuu ka micna yahay dhiiga Masiixa. Wuxuu mar u dhiigay badbadadeena*.
Matayos 26:27-28; 1 Korintos 11:25; Cibraaniyada 9:26-28

Q.111 Yaa cunaaya Irsaaqada alle*?
A. Irsaaqada alle waxaa cuno qof waliba oo ka towbad* keeno dambigiisa*. Waxaa iska leh kuwa dhan oo aaminsan badbaadada* Masiixa.
1 Korintos 10:16,17; 1 Korintos 11:18-29

Q.112 Yaa siiya baptism* iyo irsaaqada alla* kaniisada*?
A. alle* Ciise Masiixa.
Matayos 26:26-29; Matayos 28:18-20

Q.113 Muxuu Ciise Masiix u siiya kaniisada* baotisim* iyo irsaaqada allae*?
A. Wuxuu Ciise Masiix u bixiya waxyabahaan si u tusiiya in dadkaa isaga leeyahay. Waxyabahani waxay na xusuusinayaan waxa uu Ciise noo sameeye.
Matayos 28:19; Rooma 6:1-5; 1 Korintos 11:23-26

Q.114 Waa maxay ammarki Ciise ugu dambeeye uu siiye kanisadiisa* intuu nolaaye?
A. "Awoodda dhan ee cirka* iyo dhulka aniga ayaa lii siiye. Marka orda oo tagerayaal* sameysta. Baptize* ugu sameeya macaga aabaha, wiilka iyo ruuxda muqadaska ah*. Bara sidi ay ugu hogansami lahayeen waxkasta oo aan idin ku amray. Waxaana hubaal ah in aan marwaliba idin la jiro ilaa iyo marka ugu dambe."
Matayos 28:18-20

Q.115 Waa maxa laalinta alle*?
A. Maalinta alle* waa maalinta ugu horeysa ee usbuuca. Masixiyiinti ugu

horeeye waxay alle cabudi jireen malintaasi.
Falimaha Rasuul 20:7; 1 Korintos 16:2; Mujintii 1:10

Q.116 Maxaa loogu bixiye maalinta alle*?
A. Waayo malintaasi Masiixa ayaa ka soo kacay geerida.
Matayos 28:1-6; Luukoos 24:1-6; Yooxanaa 20:1

Q.117 Side ugu wanaagsan oo aan malinta alle* u adeegsanaa?
A. Waxaan si wanaagsan u adeegsani karnaa maalinta alle* marki aan u tagno dadka alle oo aa isaga caabudno oo aan isku dhiiragalino* imaanka.
Sabuurradii 27:4; Rooma 12:9-13; Kolosay 3:16

QEYBTA SHANAAD
ALLA BARIGA IYO RAJADA

Q.118 Waa maxay alla bariga?
A. Alla bariga waa marki aan alle la hadlno. Oo aan ugu shukrino wanagiisa. Oo aan qirano dambigeena*. Oo aan weydiisano waxyaabaha isaga raali galiya.
Matayos 6:6; Filiboy 4:6; 1 Yooxanaa 5:14

Q.119 Magaceen ku alla barinaa?
A. Waxaan ku alla barinaa magaca Ciise.
Yooxanaa 14:13-14; Yooxanaa 16:23

Q.120 Gortee iyo goobtee ayaan ku alla barinaa?
A. Waxaan alle baryi karnaa goorta kasta iyo goob kasta
Matayos 6:6; Efesos 6:18; Falimaha Rasuul 21:5; Kolosay 4:2

Q.121 Muxuu Ciise na siiye si aan u barano alla bariga?
A. Ciise wuxuu na siiye ducada alla*
Matayos 6:9-15; Luukoos 11:2-4

Q.122 Waa maxay ducada alle*?
A. Abaheena cirka* jooga
Aan magacaaga Sharaf* u yeelno
inay oqortoyadaada* ha timaado.
In waxa aad rabtid laguu sameeya,
Dhulka iyo cirkaba*
Ina sii nolal malmedkeena.
Dambiyadeena* inoo cafi*
Sida aan anaga dadka u cafinay*
Kuwa nagu dambabeen*
Nagu caawi in aana dambaabin* marki aan damacno.
Naga ilaali midka xun*
Matayos 6:9-13

Q.123 Meqaa codsi ayaa kujurta ducada alle*?
A. Waxaa jira lex codsi.

Q.124 Waa maxay codsiga kobaad?
A. "In aan magacaaga Sharaf* siino."
Matayos 6:9; Luukoos 11:2

Q.125 Maxaan ugu duceysanaa codsiga kobaad?
A. waxaan ku duceysanaa in dadka dhan ay ku dhawaqaan magaca alle.
Sabuurradii 8:1-2; Sabuurradii 72:18-19; Sabuurradii 113:1-3

Q.126 Waa maxay codsiga labaad?
A. "Inay timaado Boqortayadaad*”
Matayos 6:10; Luukoos 11:2

Q.127 Maxaan ugu duceysanaa codsiga labaad?
A.Waxaan ugu duceysanaa inay dadka caalamka oo dham ay maqlaan oo ay aaminaan akhbaarta wanaagsan. Waxaan ugu duceysanaa si ay ugu hogansamaan Ciise in uu ilahey* yahay.
Yooxanaa 17:20-21; Falimaha Rasuul 8:12; Falimaha Rasuul 28:30-31; Mujintii 11:15

Q.128 Waa maxay codsiga sadaxaad?
A. "In waxa aad rabtid laguu sameeya dhulka iyo cirkaba."
Matayos 6:10

Q.129 Maxaan ugu duceysanaa codsiga sadaxaad?
A. Waxaan ugu duceysanaa inay dadka dhulka joogo sameyaan waxa uu alle rabo sida malaigtaba* ay ugu sameyso cirka*.
Sabuurradii 103:19-22; Sabuurradii 143:10

Q.130 Waa maxay codsiga afaraad?
A. "Ilahayow manta qutul yowmka na sii"
Matayos 6:11; Luukoos 11:3

Q.131 Maxaan ugu duceysanaa codsiga afaraad?
A.Waxaan ugu duceysanaa inuu ilahey nasiiyo waxa dhan oo jirkeena u

baahan yahay
Sabuurradii 145:15-16; Maahmaayadii 30:8-9; Matayos 6:31-33

Q.132 Waa maxay codsiga shanaad?
A. "inoo cafi* dambiyadeena*, sida aan anakaba ugu cafinay* kuwa dambiga* naga galay."
Matayos 6:12; Luukoos 11:4

Q.133 Maxaan ugu duceysanaa codsiga shanaad?
A. Waxaan ugu duceysanaa inuu ilahey noo cafiyo* dambiyadeena*. Waxaana ugu duceysanaa inuu ilahey naga caawiyo in aan cafino* kuwa qalbiga naga dhawaceen.
Sabuurradii 51:2-3; Matayos 5:23-24; Efesos 4:32

Q.134 Waa maxay codsiga lexaad?
A.Naga caawi in aana dambabin* marki aan damacno. Naga ilaali midka xun*.
Matayos 6:13; Luukoos 11:4

Q.135 Maxaan ugu duceysanaa codsiga lexaad?
A. Waxaan ugu deuceysanaa inuu ilahey inaga dhowro dambiga*. Nagana ilaaliyo xumanta*.
Sabuurradii 119:11; 1 Korintos 10:13; 2 Timoteyos 4:18

Q.136 Alla bariga muxuu na barayaa?
A. Alle bariga wuxuu na barayaa in aan si buuxda u aamino* cawinaada ilahey.
Efesos 6:18; Filiboy 4:6; Cibraaniyada 4:16

Q.137 Halkuu jira Masiixa hadda?
A. Masiixa wuxuu jira cirka*, dhanka midig ee ilaaha aabaha ah.
Markos 16:19; Falimaha Rasuul 5:31; Rooma 8:34

Q.138 Masiixa miyuu mar kale dhulka imanayaa?
A. Haa, wuxuu u imaanayaa in uu noqda xakamkeena dhamaan dadka dunida ee maalinta ugu dambeysa. Wuxuuna badbadinayaa kuwa isaga

sugaaye.
Matayos 25:31-32; 2 Timoteys 1:7-9; 2 Timoteyos 4:1; Cibraaniyada 9:28

Q.139 Maxaa ku dhacaaya salixiinta* marki ay dhintaan?
A. Jirka salixiinta wuxuu noqonayaa ciid. Naftoodana* waxay u gaceysa si ay ula joogta alle*
Bilowgii 3:19; Wacdiyahii 12:7; 2 Korintos 5:8

Q.140 Maxaa ku dhacaaya kuwa xun marki ay dhintaan?
A. Jirka kuwa xuna wuxuu noqonayaa ciid. Naftoodana* waa la cadabayaa. Ilaheyna wuxuu u dhigaya naftooda maalinta qiyaama.
Luukoos 16:23-24; Yooxanaa 5:28-29; 2 Butros 2:9

Q.141 Kuwa dhinyat miyaa la soo noleynayaa hadana?
A. Haa, kuwa dhintay oo dhan waa la soo noleynayaa markuu Masiixa yimaado.
Danyeel 12:2; Yooxanaa 5:28-29; Falimaha Rasuul 24:14-15

Q.142 Maxaa ku dhacaaya kuwa xun maalinta uu masiixa yimaada si uu u xukumo?
A. Ilahey ayaa ugu cadabaaya naarta* ciqaab aan dhamaasha lahayn. Waxaana laga xijabayaa aragtida alle waligood.
Matayos 25:41,46; Markos 9:47,48; Luukoos 12:5; Luukoos 16:23-26; 2 Timoteys 1:9; Mujintii 20:12-15

Q.143 Maxaa ku dhacaaya dadka salixiinta* ah?
A. Dadka salixiinta* ah waxay si farxad leh ula nolanayaan ilahey. Waxay waligood ku nolanayaan cir* cusub iyo dhul cusub.
Ishacyaah 66:22-23; 2 Butros 3:13; Mujintii 21:2-4

Q.144 Side bay u ekanayaani donaan cirka* iyo dhulka cusub?
A. Cirka iyo dhulka cusub waxaan la jogeyna ilahey, ma dambabeyno. Ma dhimaneyno. Lacnad dambe ma jireyso. Murugo iyo xanun dambe ma jirayaan. Ma noqoneyno edeysanayaal, kuwa baqaaya ama cebeysan. Waxaan oganeynaa farxadda ka timaado alle.
Cibraaniyada 12:22-23; Yudaas 24; Mujintii 21:1-5; Mujintii 22:1-4.

LIISKA EREYADA

Ereyga	Sharaxa
Korsasha	Korsashada waa tallabada sharciga ee qofka lagu keeno qoyska dhexdiisa. Qofkaasi wuxuu ka mid noqonayaa canugaaga. Horaan waxaan ahayn kuwa aan ilahey aqoonin oo cadawga alle ah. Balse hadda alle ayaa inoogu yeeray in aanu nahay carurtiisa.
Sineysi	Sineysigu waa in galmo la la sameeyo qof aan ahayn haweneydaada ama ninkaada.
Malaa'ig	Malaa'igta waa adoonka ilahey oo soo gudbisa farintiisa. Malaa'igta waa ruux* malaa'igta ayaa wax wanaagsan ka sheegta alle. Malaa'igta waxay sameysa waxa uu alle donaaya. Malaa'igta ayaa wax wanaagsan dadka u sameysa kuwaasi oo ah qoyska alle. Malagga xun ayaa u shaqeeya sheydaanka*
Baptism-ka/Baptize-ka	Madaxa kaniisada* ayaa qofka in mudda ah biya dhex galiya. Kadibna qofka ayaa biyaha laga soo dhex bixiyaa. Qabkaan ayaan waxaan tusineynaa in Masiixa uu nadiif naga dhigay. Waxaa kale oo aan qof waliba tusineynaa in aan qeyb ka nahay kaniisada* marki baptized nagula sameya waxay na xasusineysa Ciise oo dhintay. Rag ayaa galiye qabriga. Balse waa uu soo nolaaday.
Muumin	Muminka waa qofka aqaana oo aaminsan Masiixa.
Baraka	Baraka waa waxyaabaha wanaagsan oo ilahey inoo sameeya. Marki aan ilahey weydiisano baraka, waxaan weydiisanaa in uu na caawiyo oo wax wanaagsan noo qabto.
Calool-gal	Waa marka uu canuga calool galo oo noolal cusub ay ka bilaabata uurka haweneyda.

Qanaaca	Qanaacadu waa in lagu faraxsanaada waxa aan haysano. In aan ogaano in wax nagu filan aan haysano.
Kaniisada	Kaniisada waa koox dad ah oo raacsan oona aaminsan wax kasta oo ku saabsan Ciise Masiix. Way isla kulmaan. Waxay baptize gareyaan muminiinta. Waxay isla cunaan irsaaqada alle. Waxay aqbalaan tacliinta Masiixa.
Istalaabka	Istalaabka waa laba alwaax oo laisku dhajiye. Marki uu Ciise nolaaye, dadka waxay dambiilayaasha ku xirijireen istalaabka si loo dilo. Ciise wuxuu ku dhintay istalaabka dushiisa.
Naclad	Waa eray u keeni kara dhibaata ama ciqaab dadka ama waxyaabaha
Shetdaan	Sheydaanka waa magaca kale ee jinniga*. Jiniga* waa midka ugu xun ee malaa'igta* xun. [fiiri malaa'ig].
Tageera	Tageera waa qofka qof kale raaca oo wax ka barta. Waa qof aaminsan Ciise. Waa qof raaca waxa uu ciise bara.
Ilal abad	Waxyaabaha horay u jiri jiray oo na jiri doona. Waxyaabaha aan lahayn bilw iyo nihaaya.
Imaan	Imaanku waa in uu qofka aamina qof ama wax. In uu ku kalsonaada* oo aamina ilahey. In uu ogaada in uu alle yahay dhab xitaa marki aan arki karin.
Cafis	Cafiska waa tusidda jacaylka iyo aan la xasuusanin waxyaabaha xun ee qofka. Marki uu ilahey na cafiyo, waxayaabaha qaldan oo aan sameynay nooma qabsanaaya.
Weyni	Weynida ilahey waa waxkasta oo ilahey quruxsaneynaaya oo na weyneynaaya, sida boqorka weyn.
Naxariis	Naxariista waa hadiyad alle oo aan la rabin in aan helono waayo waxyaaba xun oo aan sameynay. Naxariista waa waxa uu bixiyo waayo waa uu noo naxariistaa. Cafiska* iyo cawinaanta waxay ka imataa alle.

Qalbi	Qalbiga waa qeybta insaanka ugu muhiimsan. Waa qeybta jirka oo wax dareenta, fikirta oo waxyaabaha go'aan ka qaadata.
Cirka	Cirka waa meesha ay ilahey iyo masiixaba jogaan. Alle halkaas ayuu ku noolyahay oo uu xukuma. Cirka waa meesha ay dadka alle iyo ciise yaqaana ay adaan marki ay dhintaan. Waa meesha ay waligood dadka ku farxsanaani donaan oo dhibaata lahayn. Cirka iyo dhulka cusub waa guriga mustaqbalka ee dadka yaqaana ilahey.
Naarta	Naarta waa goobta uu ialehy isaga fogeeya dadka xun. Naarta waa meesha ugu hore ee lagu cadaabo dadka xun marki ay dhintaan.
Muqadas	Muqadas in la noqdo waa in laisku diyaariyo ilahey. In la noqdo sida uu alle yahay oo kale. In la noqdo ilahey ahaan. Marki aan nahay muqadas waxaanu nahay dambi la'aan. Ilahey hortiisa ayaan nadiif ku nahay.
Ruuxuda muqadaska ah	Ruuxda alle [fiiri muqadas] oo uu soo diray Ciise si dadka u caawiyo. Ruuxda muqadaska ah waa magaca kale ee alle. Oo na la yiraahdo ruuxda alle, ruuxda masiixa iyo ruuxda na caawisa. Ruuxda muqadaska ah waa qof, balse ma ahan insaan sideena oo kale ah. Waa alle la mid ah allaha aabaha ah iyo ilahyga wiilka ah [fiiri sadaxanaha]. Wuxuu dunida ka dhex qabtaa shaqada alle. Qof arkaaya malahan balse wuxuu ku dhex juraa uuna la noolyahay kuwa aamineen Ciise.
Sharaf	Sharfinta qofka waa sida wanaagsan oo qofka looga hadlo. Si fiican in loola dhaqmo waayo waad ixtirameysaa waadna qadarineysa.
Sharaf leh	In si wanaagsan loo dhaqmo. In loo nolaada qaab ixtiraam tusinaaya alle iyo dadkaba. In la noqdo qof sameynaaya waxyaaba wanaagsan oo sax ah.

Sanam	Sanamka waa waxyaabaha alwaaxa, dhagaxa ama birta laga sameeya kaasi oo ay dadka wax ka baryaan. Waa inay cabudaan* alle. Sanamka waa sawir qof ama wax uu qofka jecelyahay badalki ilahey. Sanamka waa ilahey beenaad. Wax uu qofka ka jaceylyahay ilahey.
Israel	Waa dhulka ay dadka yahuuda ah ku noolyihiin. Dadka rer israel waa magaca kale ee dadka yahuuda ah. Waa caruurta Ibrahiim, isaxaaq iyo yacquub.
Yahuud	Yahuudka waa qof ka dhashay Ibrahiim, isaxaaq iyo yacquub iyo carurtooda. Qofka aaminsan diinta* yahuuda.
Boqortooya	Boqortooyada waa goobta uu boqorka wax ka xukumo. Waa dhulka uu boqorka xukuma. Boqortooyada alle waa halka uu ilahey xukuma.
Sharci	Rules that a ruler makes to tell people how to live. The rules God gave Moses for the people of Israel. Sharciga waa waxa uu taliyaha uu dadka u sheego sida ay ku noladaan
Alle	Alle waa magaca ilahey ee Bible-ka. Waxay ka micna tahay in uu ka sareeya wax kasta oo kale oo uuna xukumo waxkasta. Magac aan adeegsana Ciise marki aan adeecna.
Nabi	Nabi wuxuu ahaa qof awood u lahaaye inuu dadka kale u sheego waxa uu alle rabo. Nabiyada waxay muda dheer ku hadli jireen magaca alle. Waa qof sheegi jiray wixi mustaqbalka dhici doona.
Guul	Guusho waa in lagu raxeyso waxyaabaha wanaagsan. Guusho waa in lagu nolaado cafimaad ama qani la ahaado. Waan guleysaneyna markay dadka wax fiican naga shegaan. Waxaan guleysaneynaa marki aan marki aan ku raxeysano naxariista dadka kale.
Dib u helis	In aad wax dib u iibsatid kadib marki ay dhumeen ama laga qaata. In aad qiima bixisid si aad wax u yeelatid.

Towbad	Towbadu waa in laga soo noqo dambiga*. In la sameeya waxa uu alle rabo. In go'aan laga qaato in aan dib loo sameynin waxyaabi xumaa oo horay loo sameeye.
Ixtiraam	Ixtiraamku waa in dadka si wanaagsan loola dhaqma sida iyaga oo aad muhiim u ah.
Qiyaamaha	Qiyaamaha waxay tahay in dib lagu soo noleeya. Waa dib lagu soo saaro.
Salixiinta	In aad noqotid qof saalax ah waxay ka micna tahay heshiis la ahaatid alle. Salixiinta waa kuwa heshiiska la ah alle. Marki uu alle qof la heshiiya, wuxuu qofkaasi u arkaa in uu nadiif yahay. Qofka saalaxa ah waa alle saxiib la ah oo aan cadw la ahayn.
Sabbath-ka	Sabbath-ka waa malinta uu ilahey ka nasaday shaqadiisa abuurka. Maalinta Sabbath-ka waa maalinta uu alle ku dhahay yahuuda* ha shaqeynina. Waxay ahayd maalin gaar ah oo ay nasadeen oo ay ilahey cabudeen.
Badbaadinta/badbada	Badbaada waa marki uu ilahey naga koriya natiijada awoodda dambiga* in lagaa badbadiya ama lagaa koriya waxyaabaha xun.
Ibliis	Ibliis waa magaca kale ee sheydaanka*. Ibliis waa malaa'ig* xumaatay. [fiiri malaa'ig].
Badbaadiye	Ciise Masiix ayaa ah badbaadiye. Qof dib inoogu soo celinaaya ilahey oo inaga korinaaya in noola ciqaaba waxyaabaha xun oo aan sameynay.
Dambi/Dambiile	Dambiga waa waxa qaldan oo ay dadka sameyaan taasi oo ka dhan ah alle ama dadka kaleba. Marki aana raacin sharciga uu alle dajiya, waa dambabnay. Marki aana sameynin waxa uu alle rabo in aana sameynin waan dambabnay. Dadka dhan way dambabaan waayo waxay la dhasheen damac xun.

Nafta	Nafta waa qeyb ka tirsan shaqsiga oo aana arki karin inta aan noolnahay, iyo noolasheena dhimashada kadib. Alle wuxuu naf siiye Adam iyo Xaawo marki uu noolasha ku afuufay. Nafta qofka waxaa marka qaar loo yaqanaa ruuxda* qofka. [fiiri ruuxda]
Ruuxda	Ruuxda waa wax aan lahayn jir oo qof arki karana uu san jirin. Alle waa Ruux. Alle wuxuu buuray ruux kale (malaa'igta*) oo aana arki karin kuwaasi oo arki karaan xumaanta ama samaanta. Nafta* qofka waxaa marka qaar loo yaqanaa ruuxda qofka. [fiiri nafta]
Sadaxanaha	Sadaxanaha waa eray la adeegsada marki laga hadlaaya ilaahga sadaxda qof ah: allaha aabaha ah, allaha wiilka ah (Ciise) iyo Ruuxda Muqadaska* ah.
Kalsoonida	Ku kalsonaantu waa in la raaco wax ama qof aad umaleyneysa in uu run yahay. In aad imaan* lahaatid ama si imaan* leh aad u dhaqantid. [fiiri imaan]
Bikra	Bikra waa qof aan wax galma ah sameynin.
Cibaado	Cibaadada wa in aad tusitid in alle uu weynyahay oo aan aad u jecelnahay. Cibaadada waa sharaf* bixin [fiiri sharaf] ama ku shukrinta alle. Waxa aan sameyni laheyne marki aan alle la joogno.

Waxaa soo guuriye:
www.clearandsimplemedia.org

Si aad u heshid bugaan oo electronic ah, booqo:
www.asimpleword.org

Si aad u baratid wax dheraad ah oo ku saabsan bugaan iyo maclumaad kani oo kale ah, la soo xiriir:
www.clearandsimplemedia.org

Waxaa tarjumay:
www.christian-translation.com